

Fasaxa samarka

Ka dib gu' ka duwan kuwii hore ayaa waxa goor dhow la gali doonaa fasaxyadii iskuulka. Inta badan dadku wey ku farxi doonaan fasaxa samarka, waxaase dhici karta in qaar dareemayaan wel wel.

Caruurta iyo dadka waaweynba waxa ay hadal hayeen gu'ga oo dhan koroona. Dad badan baa aad uga wel welsanaa caabuqan/fiiruskan iyo qaadi diisa, laakiin laga yabaa in ay waxyaale kale u dheeraayeen. Marka la galo xilliga xagaaga carruurta oo idil waa fasax. Maalmuhuna waxa ay noqon doonaan kuwo nooc kale ah. Halkan waxa aad ka helayso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan karoona fiiruska. Iyo sida aad yeelayso haddii adiga ama qof kale oo aad garanaysid uu welwelsanyahay.

Sidan ayuu caabuqa/fiiruska karoonu u dhaqmaa

Karoona waa fiirus keena xannuunka koofid - 19. Qofku waxa ku dhici kara xummad, qufac, duuf, cunaha oo xanuuna iyo shuban. Dadka intooda badan in yar bay xanuunsadaan. Dadka da'da ah iyo kuwa xanuuno hore qabay waxaa dhacda in ay aad ula xanuunsadaan.

Cudurku wuxuu ku fidaa marka qof qufaco ama hindhiso. Dhibco yar yar oo ka yimid qofkaa qufacaya ama hindhisaya, ayaa markaa waxay ku dhacaan dusha sheeyada ama dadka ka agdhow ruuxaas korkooda.

Si'aadan adiga u xanuunsan ama cid kale ugu daaran sidan samee:

- Dhaq gacmaha inta badan oo weliba in dowl ah adoo isticmaalaya saabuun.
- Ku qufac laabatada gacantaada.
- Gacmahaada ka ilaali wejigaada.
- Gurigaada ku ekow hadaad xanuunsantahay (Xataa haduu yahay xanuun yar)
- Markaad xanuunka ka ladnaato, sii joog guriga laba maalmood oo kale.
- Hala kulmin dadka xanuunsan amaba da'da ah, kula hadal taleefoon.

Xaquuqda carruurta

Xaquuqda carruurta waa sharci iswiidhisha ah oo dhaqan galay sanadka 2020. Waxaa sharcigaa ku qoran xaquuqda carruurta leedahay. Waxaa ka mid ah in carruurta xaq u leeyihiin iney ogaadaan xaqooda. Waxaa sidoo kale ku qeexan in carruurta helaan macluumaad/infoormeeshin

Hadaad wel welsantahay - la hadal qof kale.

Adiga ama qof aad taqaan, ma walwalsanyahay ama xaaladiisa caafimaad ma liidataa? La hadal waalidkaa ama qof kaloo weyn oo aad ku kalsoontahay.

Hadaad ku hadasho afafka Iswiidhishka, ingiriiska ama carabiga waxaad wici kartaa, la sheekeysan kartaa (jaadeyn kartaa) amaba iimayl u diri kartaa hay'adda BRIS. Halkaa waxaa jooga dad yaqaan sida loola hadlo caruurta dhibaateysan. Hadaad wacdo BRIS uma baahnid inaad isu sheegto. Biilka telefoonkana lagama arkayo inaad wacday. BRIS waxaa macnaheedu yahay "Xuquuqda caruurta ku leedahay bulshada" **Nambarkooda telefoonka waa kan: 116 111**



Haddaad ku beegto telefoonka kodka QR-ka, waxa aad geli doontaa beyj interneetka ah.

Xafiiska u adeega bulshada ee degmadaada ayaad caawinaad ka heli kartaa haday ku haysato dhibaato guriga ah. Ka raadi "Socialtjänst" beyjka interneetka ee kamuunkaada. Xusuusnoow marna ma noqon karto qaladka carruurta in qof weyni murugaysanyahay oo taasi keento inuu si xun u dhaqmo.

Hay'adda bad baadada caruurta (Rädda Barnen) waxay leedahay App aad soo dejisan karto oo la yiraahdo "safe place"

Hay'adda ka hortaga masiibooyinka ee gobolka Kalmar waxay wada shaqen ka dhaxaysaa dhammaan degmooyinka gobolka Kalmar, Maamulka iyo dhammaan hay'adaha dawliga ee gobolka ka jira. Dhibaataada ku timaada mujtamaca wadajir ayaa loo go'aamiyaa la iskana kaashada. Hadda waxaa intii suurtoogala si fiican loola tacaalaya cudurka corona.



facebook.com/krissamverkan.kalmar

Kalmar kommun

